Somali | Soomaali

# Waxa laga filan karo ka-falcelinta dillaaca COVID-19

## Macluumaad loogu talagalay dadka deggan saraha-dhaadheer ee guryaha dadweynaha ah

**Dawladda Victoria waxaa ka go'an ilaalinta caafimaadka, badbaadada iyo samaqabka dhammaan dadka reer Victoria. Waxaan la shaqeyneynaa dadka deegaanka si aan uga hortagno, u diyaarinno ugana jawaabno caabuqa coronavirus (COVID-19) ee guryaha dadweynaha si adiga iyo dadka aad jeceshahay loo bad baadiyo.**

Haddii weligaa aad welwel ka qabtid in COVID-19 la isugu gudbiyo dhismahaaga oo aad halis ugu jirto, waxaan meel marin doonaa jawaab-celin cudurka ah si aan adiga iyo dadka aad jeceshahay u badbaadino.

**Dawladda Victoria iyo adeegyada caafimaadka bulshada maxalliga ah ayaa kaala shaqayn doona inay ku ogeysiiyaan waxaad u baahan tahay inaad samayso, waxa aad filan karto isla markaasna ku siin doona macluumaad iyo taageero.**



## Baaritaanka iyo is-go'dodminta

Calaamadaha COVID-19 waxaa ka mid ah qarqaryo ama dhidid, qufac, qandho, dhuun xanuun, neefta oo ku qabata, sanka oo duuf yeesha ama lumis ama isbeddel ku yimaada dareenka urta ama dhadhanka. Dadka qaarkiis waxaa kaloo laga yaabaa inay la kulmaan madax xanuun, muruq xanuun, sanka oo xirma, lalabbo, matag iyo shuban.

**Haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadahan, si kasta oo ay u sahlan yihiin, waa inaad raadsataa talooyin oo aad is baartaa. Si aad talooyin dheeraad ah u hesho, wac Khadka Coronavirus ee 24-ka saac ah 1800 675 398 ama dhakhtarkaaga.**

Haddii lagaa helo COVID-19, ama laguu aqoonsado inaad tahay **xiriir dhow**, Waaxda Caafimaadka iyo kooxaha raadinta xiriirka ayaa kula soo xiriiri doona. Waxay kugu hagi doonaan waxa lagaa doonayo inaad samayso si aad isku baartid oo aad isku-go'doomiso.

Haddii loo baahdo inaad is-go'doomiso intaad sugayso natiijadaada ama loo baahan yahay inaad is-karantiinto muddo 14 maalmood ah, waa muhiim inaadan gurigaaga ka bixin.

**Xiriir dhow** waa qof ay u aqoonsadeen raad-raacyada Waaxda Caafimaadka inay waqti la qaateen qof qaba **coronavirus (COVID-19)**.

### Haddii natiijada baaritaankaagu noqdo (positive) oo micnaheedu yahay in lagaa helay cudurka ama laguu aqoonsado xiriir dhow, waxaan hubin doonnaa inaad haysatid gargaarka aad u baahan tahay haddii ay tahay inaad is-go'doomiso, oo ay ku jiraan:



cuntada laguu keeno taas oo waafaqsan shuruudaha cuntada ama dhaqanka



in laguu keeno sahayda daruuriga ah, sida daawada



helitaanka taageero maaliyadeed iyo mid shaqsiba si ay kuu caawiso inta aad is-go'doominayso



in lagaa caawiyo inaad u guurtid hoy kale si aad isu-go'doomiso, haddii loo baahdo



in lagaa caawiyo helitaanka dukumenti kasta oo laga yaabo inaad ugu baahan tahay shaqada, iskuulka ama meelo kale



caafimaadka maskaxda iyo taageerada ladnaanta



taageerada bulshada iyo turjumaadda



qalabka ilaalinta shaqsiyeed oo ay ku jiraan maaskiyo

## In wixii soo cusboonaado lagula socodsiiyo

### Waxaan kula socodsiin doonaa wax kasta oo jawaab celin oo ku saabsan cudur ka dillaacay dhismahaaga isla marka ay habboon tahay in sidaas la sameeyo.

Xaalad kastaa way ka duwan tahay xaalada kale, sidaa darteed jawaabteena mar walba isku mid ma noqon doonto. Waxaa ka mid noqon kara:

- in laguugu soo garaaco albaabka si aan kuula hadalno. Haddii aad u baahan tahay turjubaan, waan kuu diyaarin doonaa
- macluumaad ku daabacan luqado kala duwan
- macluumaad la geeyo sanduuqaaga boostada
- fariimaha qoraalka ah
- fadhiyada macluumaadka bulshada ee internetka.

Haddii dhismahaagu leeyahay adeeg kalkaaliso caafimaad, waxaad kaloo weydiin kartaa macluumaad.






## Nadiifinta iyo xakamaynta caabuqa

- Meelaha ay ka mid yihiin meelaha gacmaha lagu qabsado ee jaranjarada, badhamada wiishka, gacanta albaabka, sagxadaha dharka lagu dhaqo, meelaha qashin -qubka iyo meelaha kale ee la wadaago ayaa lasii wadi doona nadaafintooda iyo jeermiska in laga dilo maalintiiba saddex jeer.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragtid dad xiran qalab ilaalin shaqsiyeed (personal protective equipment) oo samaynaya nadaafinta iyo jeermis dilida.
- Nadaafad qoto dheer ayaa la sameyn doonaa taas oo waafaqsan Waaxda Qoysaska, Xaqsoorka iyo Guriyeynta nadiifinta iyo tilmaamaha caabuqa.
- Talooyinka Xakamaynta Kahortagga Caabuqa iyo kalkaaliyaasha ka jawaab celinta ayaa soo booqan doona dhismahaaga si ay u qiimeeyaan xaaladda oo kaagala taliyaan wixii kale ee la samayn karo si goobta loo ilaaliyo.
- Si loo yareeyo halista caabuqa, waxaa laga yaabaa in isbeddello lagu sameeyo adeegyada guriga laguugu keenayo, dhar -dhaqidda ama ururinta qashinka.
- Haddii aad u baahan tahay qalab ilaalin shakhsiyeed (personal protective equipmen) oo dheeraad ah, waa lagu siin karaa.

## Amniga

- Marka uu dillaaco cudur saf-mar ah falcelinteeda waxaad ku arki kartaa dad ka socda shirkadaha amniga ama Victoria Police oo ku sugan dhismaha. Waxay kaa caawin doonaan in adiga iyo dadka aad jeceshahay ammaan aad ku noolaataan waxayna gacan ka geysanayaan in la xaddido faafidda caabuqa.

## Tallaal

- Tallaallada COVID-19 waa lacag la'aan, ammaan ah isla markaasna ikhtiyaari ah
- Qaadashada tallaalka ayaa kaa ilaalinaysa inaad la xanuunsatid COVID-19. Tallaallada laga isticmaalo Australia waxay aad waxtar ugu leeyihiin ka-hortagga cudurrada halista ah iyo dhimashada ka imaan karta COVID-19.



**Macluumaad ku saabsan sida loo ballansado ballantaada tallaalka COVID-19, booqo Sameyso ballanta tallaalkaaga <www.coronavirus.vic.gov.au/book-your-vaccine-appointment>**

## Xageen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

La hadal rugaha caafimaadka ee goobtaada (haddii la heli karo), ama shaqaalaha goobta jooga.

Kawac khadka tooska ah ee Coronavirus **1800 675 398** wixii macluumaad dheeraad ah.
Haddii aad u baahan tahay inaad kula hadashid qof luqad kale, riix eber (0) marka khadka lagugu xiro.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan coronavirus iyo sida looga badbaadi karo booqo **coronavirus.vic.gov.au**

Si aad ugu hesho dokumentigan qaab kale iimayl ugu dir Waaxda Qoysaska, Cadaaladda iyo Guriyeynta <RREMengagement&partnerships@dffh.vic.gov.au>

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.
© Gobolka Victoria, Australia, Waaxda Qoysaska, Xaqsoorka iyo Guriyeynta, Luulyo 2021.

Marka laga reebo wixii si kale loo tilmaamay, sawirada daabacaadan waxay muujinayaan moodeellada iyo qaababka tusaalaha oo kaliya, mana aha inay muujinayaan adeegyada dhabta ah, tas -hiilaadka ama dadka qaata adeegyada.

Daabacaadan waxaa ku jiri kara sawirrada dad dhintay oo Aborijinis iyo Torres Strait Islander ah.

Daabacaadda waxaa maamulay Finsbury Green (2107065)